

**Sharciga 1<sup>da</sup> Agoosto 1958, lamba. 24 diw.**

**Dheereyn muddada Golaha Xeerdejinta, ee Soomaaliya.**

### **MAAMULAHA**

Markuu arkay Oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

### **WUXUU GODDOOMINAYAA SOONA SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

#### **Qod. 1**

Dhammaadka mudda jiritaanka Golaha Xeerdejinta, ee ku xusan Amar-gooyada 6 Jennaayo 1956, lamba. 1, waxa loo gooyey, marka laga reebo wixii dheereyn ah, 31<sup>ka</sup> Disember 1958, ayada oo sii-ahaaneyso mid wax looga beddelay si waafaqsan axkaamta ku xusan qodobka 1aad, ee Sharciga 27 Juun 1958, lamba. 16.

#### **Qod. 2**

Sharciga waxa uu dhaqangelayaa taariikhda marka ay tahay 1<sup>da</sup> Agoosto 1958. Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ah, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta, oo ku gudboon, waxa khasab ku ah in uu dhowro kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Taariikhda Muqdisho maanta oo ah 1<sup>da</sup> Agoosto 1958.

Ku-Simaha Maamulka

**Franca**

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**